

AMARKA n. 18 rep.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMALIYA
MAAREEYE

MARKI UU ARKAY wareegtada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 9ki disseembar 1952, n. 2357;

MARKI UU TIXGELIYEEY baahida loo qabo in Muqdisho laga asaaso Machad cilmiga sharciga, dhaqaalaha iyo bulshada, si loogu suurto geliyo dhallinyarada in ay raacdaan waxbarasho derejo sare ah, iyo si loo diyaariyo dad aqoon leh oo qabta jagooyinka waaweyn ee masuuliyadda maamulka garsoorka gudihiis, bulshada iyo dhaqaalaha Somaaliya;

MARKI UU ARKAY qod. 8 ee ilaalinta Dhulka Soomaaliya;

MARKI UU ARKAY qod. 4 ee wareegtada madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 9 disseembar 1952, n. 2357;

MARKI UU DHGEYSTAY Gudiga Maamulka;

WUXUU XEERAYNAYAA:

Qod. 1.

Waxa Soomaliya laga asaasay, “Machad sare ee cilmiga sharciga, Dhaqaalaha iyo bulshada” xaruntiisuna tahay magaalada Muqdisho.

Qod. 2.

Machadku wax uu bixinaya diboloomada cilmiga sharciga, dhaqaalha iyo bulshada o oleh laba takhasus, sharciga iyo dhaqaalaha.

Qod. 3.

Muddada dowrada lagu qaadanayo guusha mid ka mid ah dibloomo waa afar sano. Maadooyinka la qaato saddexda sano ee ugu horreysa waa ka dhexeysaa labada Dibolooma. Sannadka afraad ayaa la kala bixi maaddooyinka oo loo habeeyey ku takhasusidda kala duwan ee mid ama tan kale.

Qod. 4.

Waxa ay ka kooban yihin Dibloomooyinka Machadka loo qaadan karo dibloomooyinka guud, sayniska iyo farsamada (xisaabaadka) iyo Dugsiga Sare ee Muqdisho.

Kuwa kale oo leh aqoon u dhiganta tan Talyaaniga, Soomaali ama ajnabi ayaa laga yaabaa in loo ogolaado Machadka kadib tartan loogu talagalay shahaadooyinka iyo imtixaannada, oo lagu ogeysiinayo wareegtada Maareeyaha.

Qod. 5.

Machadka waxa lagu xiray aqoon isweydaarsi lagu qabto machadka kuna saabsan tababarsho isxilqaan maddooyinka la dhigo iyo dowrooyin gaar ah oo bilaasha.

Qod. 6.

Waxaa wax baraya macallimiin uu XEER ku soo magacaabay Maareeyuhu, ka dib marki uu dhegeystay Guddiga Maamulka.

Qod. 7.

Golaha Maamulka ee Machadka waxa uu leeyahay waajibaadka howlaha waxbaridda Machadka waxana uu ka kooban yahay macallimiinta Machadka iyo Agaasimaha horumarinta bulshada ee MTMS.

Qod. 8.

Golaha Maamulka waxa uu magacaabaa Raktarka Machadka, kaas oo laga dhex dooran karo dad kabaxsan isla Golaha laftooda.

Raktarku waxa uu magacaabaa ku-xigeen oo laga dhex doorto xubnaha Golaha.

Qod. 9.

Si loo helo dowrada sannadlahaa ah ee soo socota, ardaydu waa inay si joogto ah u xaadiraan casharrada oo ay ka gudbeen tirada imtixaannada loo qoondeeyey sannad kasta.

Qod. 10.

Nadaamka Machadka iyo xeerarka dhameystirka iyo nidaaminta ee lagu dhaqan gelinayo Sharcigaan waxaa lagu soo saari doonaa Wareegtada Maareeyaha.

Muqdisho, 10 setembar 1954.

MAAREEYE
Martino
